



# ISU DIYAARI ISTICMAALKA GAADIIDKA DADWAYNA MUDDADA CIMILADA JIILAALKA



**TAKE WINTER  
BY STORM**

**La soco saadaasha cimilada si aad u ogaatid heerkulkada barafka fadhiista iyo barafka soo dhaca. Tilmaamahani waxay kaa caawin karaan inaad is diyaariso ka hor inta barafka fadhiisanin iyo inta uusan soo dhicin.**

## Ogow Intaanad Tagin

- Inta cimilada jiilaalku aanay soo galin, qorshe samee iyo qorshe gurmada oo aad isticmaalayso gaadiidka dadwaynaha marka xaaladaha socdaalku kasii daraan. Ka hubi websaytada wakaaladaha gaadiidka kala duwan ee aad isticmaasho si aad u hesho macluumaadka socdaalka jilaalka.
- Hubi xaaladaha cimilada iyo waddada ka hor intaanad bixin. Haddii gaadiid dib u dhaco meelaha aad qorshaysay inaad tagto, markaa safarkuna wuxuu u badan yahay inuu dib u dhaco.
- Internetka ka hubi xaaladda adeegga tareenka, baska ama doonta ee laga ogaado wakaaladda ku habboon.
- Ogow dariiqada barafka ee siistemyada iyo dariiqyada aad isticmaasho; la soco in goobaha qaar aan laga shaqayn inta barafku jiro.
- Isku qor si aad u hesho digniinta ay bixiyahaan wakaaladaha gaadiidka kala duwan ee aad isticmaasho, ama ay dhici karto inaad isticmaasho waqtiyada cimilada jiilaalka.
- Sidoo kale, isku qor si aad u hesho ogeysiisyada gurmada deegaanka iyo gobolka.
- Baro siyaasadaha loo-shaqeeyahaaga ee ku saabsan imaanshaha shaqada marka lala kulmo xaaladaha gurmada, iyo marka adeegyada gaadiidku xaddidan yahiiin.
- Haddaad qorshayso inaad shaqada guriga ka waddo, horay u tijaabi qalabkaada (hardware) iyo barnaamijyada aad ku shaqaysid (software) iyo hayso qalabka lagu buuxiyo (chargers) iyo beetariyo dheeraad ah kayd ahaan.

## Sida la isku diyaariyo

- Sii naftaada waqti dheeraad ah oo aad ku raacdo bas, tareen ama doon. Cimilada jiilaalku waxay arbusi kartaa jadwallada iyo khadadka. Sidoo kale, raacidda badan waqtiyada cimilada xun tahay waxay dhalin kartaa in saxmadda rakaabka.
- Isu diyaari sugis ka badan intii caadiga ahayd tilifoonka si aad u hesho adeegga macluumaadka macmiilka.
- U dhaqaaq meelaha baabuurta laga raaco ee xarumaha gaadiidka waawayn. Adeegga baska, aad meelaha basku istaago ee khadadka waawayn ama meelaha kala wareejinta waawayn sida meelaha la dhigto baabuurta lagana raaco gaadiidka dadweynaha, xarumaha gaadiidka, ama xarumaha dukaamada.
- Si diiran u labbiso inta aad u socotid ilaa meesha basku istaago, meelaha treenka laga raaco, iyo meelaha doontu ku xidhato. Hubso inaad qaadatid kabo ku habboon cimilada. Waxa dhici karta inaad dibadda ku sugto in ka badan intaad caadi ahaan sugtid.
- Diyaarso alaabtaada soona qaado biyaha la qaadan karo oo dheeraad ah, cuntada aan halaabin, agabka yaryar ee gargaarka degdegga ah, daawo, tooshash yaryar oo leh beetariyo dheeraad ah iyo siidhi (aad caawimad ku wacan kartid) waa intaas oo aad la kulantid gurmada.
- Dadka raaca baska waa inay ku sugaan meesha basku joogsado, meesha ugu sarraysa ama meesha ugu hoosaysa taaga, sababtoo ah basasku inta badan ma awoodaan inay u joogsadaan rakaabka meelaha doonka.
- Ogow in barnaamijyada la socoshada basasku saxnaansuhu ka lumo marka basaska dib khad loogu sameeyo ama dib aad ugu dhacaan, markaa adeegyada smartphone-kaagu waxa dhici karta inaan la isku hallayn wakhtigan.
- Ku ilaali aaladaahaaga xidhiidhka (tilifoonada gacanta, smartphones-ka, laabtobyada, tablets-ka) inay dabku buuxo ka hor intaanad u bixin hawl qaadanaysa waqti dheer. Si aad u hubiso taakulo, qaado buuxiyeyaasha aaladaha xidhiidhka.